

Wararkii ugu dambeeyay ee COVID-19 ee loogu talagalay degganeyaasha - Cadadka 24

Degganeyaasha Qaaliga ah,

Fadlan hel cadadka ugu dambeeyay ee warsidahaaga. Cadadkan wuxuu bixinayaa macluumaad cusub ee ku saabsan tallaalka hargabka ee soo socda iyo sidoo kale macluumaad loogu tala galay waalidiinta caruurta dugsiga-taga. Waxaan ku dhiiri galinaynaa dhamaan degganeyaasha inay wakhti ku qaataan si ay u ogaadaan macluumaadka la siiyay.



Wargeyskan waxaa sidoo kale laga heli karaa websaydka loogu talagalay xarumaha hoyga qaybta 'Degganeyaasha' oo ay weheliso turjumaado ah luqado kala duwan.

Fadlan nala soo socodsii mawduucyada aad jeceshahay inaad ku aragto warsidayaasha mustaqbalka adiga oo noogu soo dira emayl ipasinbox@justice.ie

Ugu dambeysta, waxaan jeclaan lahayn inaan kaaga mahadcelinno iskaashigaaga socda iyo aan kuu rajeynayno caafimaad wanaagsan.

Kooxda IPAS

Tallaalka Hargabka

Anagoo ku sii dhowaannaya xilliga qaboobaha, HSE waxay dadka ku dhiirrigelineysaa inay qaataan tallaalka hargabka si ay naftooda iyo qoysaskoodaba ku hayaan badbaado.

Tallaalka hargabka ee loogu talagalay kooxaha halista ku jira ayaa la heli doonaa laga bilaabo dhammaadka Setembar 2020. Tallaalka hargabka ee loogu talagalay carruurta waxaa la heli doonaa bartamaha Oktoobar 2020.

Fadlan riix linkiyada soo socda si aad u aragto fiidiyoow ku saabsan tallaalka hargabka ee loogu talagalay kooxaha halista ku jira iyo carruurta da'doodu tahay 2-12 oo ah luqqado kala duwan: [Urdu](#); [Ruush](#); [Romaniyaan](#); [Burtuqiis](#); [Boolish](#); [Mandarin](#); [Faransiis](#); [Carabi](#)

Intaa waxaa sii dheer, taxane ah waraaqo la turjumay iyo tilmaamo si sahlan loo akhrin karo ee ku saabsan talaalka hargabka ayaa la heli karaa si looga soo dejisto websaydka HSE. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan riix [halkan](#).

Wararka Cusub ee Dugsiyada

Dugsiyada way furan yihiin hadda si ay ardayda ugu soo noqdaan dugsiya. Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo qoysaska waxaa laga heli karaa halkan: <https://www.gov.ie/en/publication/a04fc-advice-for-students-and-their-families/>.

Si loo yareeyo halista ku daarashada bulshada dugsiya cudurka COVID-19, waxaa aad muhiim u ah in caruurta ay guriga joogaan haddii aysan caafimaad qabin ama haddii ay kula taliyeen caafimaadka bulshada inay is-karantiilaan.

Qofna waa inuusan aadin dugsiya haddii uusan caafimaad qabin ama qof ka mid ah qoyskooda uusan caafimaad qabin oo uu layhay astaamaha u dhigma COVID-19.

Haddii ay waalidiinta u sheegeen talo-bixinta caafimaadka bulshada in ilmahooda ay tahay in ay is-karantiilaan/is-godoomiyaan, carruurta waa inaysan tagin dugsiya.

Adeegga Taageerida Waxbarashada ee TUSLA waxay sidoo kale la shaqeynayaan IPAS si ay u taageerto dhammaan ardayda inay ku noqdaan dugsiya oo waxayna diyaar u yihiin inay siiyaan hagitaan iyo talo waalidiinta/ilaaliyayaasha.



Waxqabadyada Xarunta - Birchwood House (Guriga Birchwood)

Biliihii xagaaga oo dhan, Maamulayaasha Xarunta waxay soo bandhigeen waxqabadyo kala duwan oo loogu talagalay degganeyaasha.

Gudaha Birchwood House (Guriga Birchwood) ee ku yaala Waterford, shaqaalaha waxay abaabuleen kaamka xagaaga oo loogu talagalay carruurta deggan xarunta. Waxyaalihii ugu waaweynaa waxaa ka mid ahaa samaynta meel dhibac ah ee akhriska carruurta/maktabad oo ay la socoto booqashada fanaaniinta farshaxanka/sheeko-sheegayaasha (storytellers) ee deegaanka . Xarunta waxay hadda bilowday inay sameyso beer-khayaali ah (Fairy garden), oo leh qayb ubax duurka oo loogu talagalay shinnida.

Intaas waxaa sii dheer, xarunta waxay sameysay guriga beerta (polytunnel) oo degganeyaasha waxay bilaabeen inay abuuraan kaabash (Kale), khudaarta caleenta ah ee cauliflower ama borokooli (broccoli), saladho, iwm.

Waa kuwan qaar sawirro oo ah natiijooyinka waxqabadyada ka socda Birchwood House (Guriga Birchwood):



Haddii aad jeceshahay inaad wadaagto qaar ka mid ah sawirrada waxqabadyada ka dhacaya xaruntaada, fadlan la xiriir IPASinbox@justice.ie.

Khadka-caawinta Taleefanka-Lacag-la'aanta ah ee Degganeyaasha - 1800 929 008

Khadka-caawinta taleefanka-Lacag-la'aanta ah ayaa loo sameeyay si loo taageero degganeyaasha inta lagu jiro COVID-19.

Waxaan fahamsanahay in uusan qof walba dareemin kalsooni inuu si toos ah ula xiriiro Waaxda sidaas darteed waa wax muhiim ah in la ogaado iyadoo IPAS ay sameysay khadkan-caawinta, waxaa maamusha hay'ad samafal ah - Adeegga Qaxootiga ee Jesuit [Jesuit Refugee Service] (Ireland).



Ku hel warsidahan WhatsApp-ka ama imayl-ka

Haddii aad jeclaan lahayd in Maamulaha Xaruntaada uu kuugu soo diro warsidahan isagoo isticmaalaya liisaska War-baahinta WhatsApp (WhatsApp Broadcast) ama liisaska qaybinta imaylka, fadlan raac tilmaamaha hoos ku qoran:



1. Sii maamulaha xaruntaada oggolaansho qoraal ah oo u sheegaya inaad rabto in lagugu daro liiska War-baahinta WhatsApp (WhatsApp Broadcast) si aad u hesho warsidaha.
2. Weydii maamulaha xaruntaada lambarkooda taleefanka gacanta oo ku dar lambarkaas liistada cinwaanada ee taleefankaaga.

Maamulaha xaruntaada ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo liiska War-baahinta WhatsApp (WhatsApp Broadcast) si uu kuugu soo diro linki oo aad ku akhrisan karto warsidayaashaas online-ka. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad la socotid dhammaan wararka ugu dambeeyay ee ku saabsan COVID-19.

Haddii aadan mar dambe rabin inaad ku hesho link-iga warsidaha WhatsApp-ka ama imayl, fadlan weydii maamulaha xaruntaada inuu kaa saaro liisaskooda qaybinta.



Fadlan noogu soo sheeg IPASinbox@justice.ie haddii ay jiraan mowduucyo kale oo aad jeclaan lahayd inaan ku soo darno warsidayaasheena. Waxaan rajeyneynaa in macluumaadka halkaan lagu bixiyey ay ahaayeen mid wax tar leh.

Iyadoo aan kuu rajayneyno rajo aad u wanaagsan oo ka socda kooxda IPAS iyo Waaxda Caddaaladda iyo Sinaanta.



An Roinn Dlí agus Cirt
agus Comhionannais
Department of Justice
and Equality

Macluumaadka ku qoran warbixintan ugu dambeysay waxaa loogu talagalay degganayaasha xarumaha hoyga IPAS, Saaxiibada Kooxaha Xarunta (Friends of the Centre Groups) iyo asxaabta NGO-yada. Wixii su'aalo ah ama fikrado ah waxaa loo diri karaa IPASinbox@justice.ie

